# MACLUUMAADKA GUUD

## 1. Agabka Kaalmada Soodhaweynta

Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa bixin doona waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada iyadoo u cuskaneysa Shuruucda Qaxootiga, sida wax laga beddelay iyo/ama loo beddelay.

Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa kamid noqon doona:

1) Gunno dhaqaale oo loogu talagalay baahiyaha aasaasiga ah (cuntada, dharka iyo kabaha).
2) Gunno dhaqaale oo loogu talagalay korontada, biyaha iyo kharashaadka yaryar ee shakhsi ahaaneed. Qadarka gunnada dhaqaale ee loogu talagalay kharashaadka yaryar ee shakhsi ahaaneed waxaa loo go'aamin doonaa iyadoo loo eegayo goobta uu daggan yahay codsadaha.
3) Gunno kiro ah oo la siinayo mulkiilaha guriga.
4) Lacagta kirada oo hormaris ah

Qadarka Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo loo cuskanayo go'aanka Golaha Wasiirada ee ku aadan daboolista Agabka Kaalmada Soodhaweynta ee Codsadayaasha codsanaya Magangalyada Caalamiga ah. Qadarka waxaa lagu go'aamiyaa iyadoo lagu saleynayo tirada xubnaha qoyska; iyaga ayaa ah qadarka ugu badan ee wax lagu siinayo oo mana jiri doonto mar laga badin karo qadarkaas.

| Tirada xubnaha qoyska | Cunto, dhar iyo kabo | Korontada, biyaha iyo kharashaadka yaryar marki heshiiska kireynta la keeno | Korontada, biyaha iyo kharashaadka yaryar marki heshiiska kireynta **AANAN** la keenin |
|---|---|---|---|
| 1 | €186 | €75 | €28 |
| 2 | €279 | €100 | €37 |
| 3 | €372 | €140 | €52 |
| 4 | €465 | €170 | €63 |
| 5 iyo ka badan | €558 | €200 | €74 |

| Tirada xubnaha qoyska | Gunnada kirada | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| | Nicosia | Limassol | Famagusta | Larnaca | Paphos |
| 1 | €100 | €100 | €100 | €100 | €100 |
| 2 | €200 | €218 | €146 | €174 | €146 |
| 3 ilaa 4 | €290 | €317 | €211 | €252 | €211 |
| 5 iyo ka badan | €364 | €397 | €265 | €315 | €265 |

2. <u>Ka Faa'iideystayaasha Agabka Kaalmada Soodhaweynta</u>

Ka faa'iideystayaasha ayaa ah **codsadayaasha codsanaya Magangalyada Caalamiga ah, kuwaas oo daboolista Agabka Kaalmada Soodhaweynta aanan lagu dabooli karin Xarumaha Soodhaweynta iyo/ama Hoyga u ah,** ee ay ka daggan yihiin aaggaga ay maamusho Jamhuuriyadda Qubrus iyo labadaba codsadaha iyo xubnaha katirsan qoyskiisa marka ay buuxiyaan shuruudahaan soo socda:

- Waa in aanay shaqeynin xubin ka mid ah qoyska codsadaha.
- Marka ay dhacdo in codsadaha ama xubin katirsan qoyska uu shaqeeyo, qoysku waa uu sii qaadan karaa gunnada waa haddii dakhliga soo gala bishii uu kayar yahay wadarta cadadka gunnada guud ee uu qoysku xaq u leeyahay iyadoo lagu saleynayo jaantuusyada kore.
- Wareegto uu soo saaray Wasiirka Shaqada iyo Caymiska Bulshada, oo ku taariikheysan 4/10/2021, xaqa gelitaanka suuqa shaqada ayaa la siiyaa Codsadayaasha Codsanaya Magangalyada Caalamiga ah **hal (1) bil** kadib soo gudbinta codsiga magangalyada caalamiga ah. Marka codsadayaasha la siiyo xuquuqda shaqada, **waa inay:**

  (a) in aanay shaqeynin isaga diiwaangeliyaan Diiwaanka Adeegga Shaqada Dadweynaha;

  (b) ku aqbalaan shaqada meelaha sida gaar ah loogu asteeyey, iyadoo loo cuskanayo Wareegtada Wasiirka Shaqada iyo Amniga Bulshada;

  (c) ka qeybqaataan tababarka farsamada gacanta iyo/ama koorsooyinka tababarka, haddii lagu casuumo inay sidaas sameeyaan, oo ayna bartaan afka Giriigga;

  (d) aqbalaan adeegyada hab shakhsi ahaaneed oo ay bixinayaan la-taliyayaal shaqo oo khaas ah oo ka tirsan Adeegga Shaqaalaynta Dadweynaha;

  (e) aqbalaan kulamada iyo booqashooyinka loogu tagayo si qiimeynta xogta oo goobta ah ay uga soo qaadaan mas'uuliyiin aqoon u leh adeegga bulshada ee la xidhiidha qorshaynta waxqabadyada xirfadahooda, latalinta, iyo taageerada nafsiga ah iyo dhaqancelintooda bulsho;

**Codsadaha codsanaya magangalyada caalamiga ah ee naafada ah ama aan shaqo qaban karin ama kaweyn da'da 63 sano loogama baahna inuu iska diiwaangeliyo Adeegga Shaqada Dadweynaha.**

3. <u>Xubnaha qoyska</u>

Xubinta qoyska micnaheedu waa mid kasta oo kamid ah xubnahaan soo socda oo kamid ah xubinta qoyska codsadaha ee ku sugan aagagga ay maamusho dawladda Jamhuuriyadda Qubrus ee la xidhiidha codsiga.

Ujeedooyin la xiriira baarista codsiga Agabka Kaalmada Soodhaweynta, xaalada codsadaha codsanaya magangalyada caalamiga ah waa in sidoo kale ay la qabaan xubnaha katirsan qoyska codsadaha ee la daggan, iyada oo aanan loo eegeynin inay kujiraan codsiga codsadaha ee magangalyada caalamiga ah ama inay iskood u codsadeen magangalyada caalamiga ah iyo in kale:

a) xaaska ama lammaanaha codsadaha, oo ay codsaduhu isla nool yihiin oo ayna guri iskula wadaagaan ujeeddooyin degaan;

b) carruurta aan qaangaarin iyo kuwa aan weli guursan ee midkood codsadaha ama codsadaha ama xaaskiisa, ama lammaanaha lagu sheegay baaragaraafka (a).

I. Ilmo aanan weli guursan oo weli dhigta dugsi.
II. Ilmo aanan weli guursan oo gaaray da'da 18 sano oo shaqo doon ah, xitaa haddii ay codsadeen magangalyada caalamiga ah.
III. Ilmo aanan weli guursan oo da'doodu u dhaxeyso 18 iyo 23 sano, haddii ay dhigtaan waxbarashada caadiga ah.

4. **<u>Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa loo bixiyaa iyadoo la raacayo shuruudahaan soo socda:</u>**

1. Codsiyada ka socda dhinacyada daneynaya waa in loo gudbiyaa XARUNTA SOO DHAWAYNTA KOOWAAD, POURNARA iyo xafiisyada samafalka ee gobolka (oo masuulka ka ah arrimaha codsadayaasha magangalyada caalamiga ah) iyadoo la isticmaalayo foomka codsiga gaarka ah ee Adeegga Daryeelka Bulshada, kaas oo ay tahay in si sax ah uu u dhamaystiro oo uu saxiixo codsadaha oo ayna la socdaan dhammaan macluumaadka iyo shahaadooyinka lagama maarmaanka ah, kuwaas oo agaasimuhu u arko in aanan looga maarmin baaritaanka codsiga.

2. Haddii codsiyada aanan si sax ah loogu buuxin macluumaadka gaarka ah ee codsadaha iyo qoyskiisa ama dukumiintiyada caddeynaya aqoonsiga codsadaha iyo qoyskiisa aanan lagu lifaaqin, lama aqbali doono.

3. Codsiyada aanan wadan ciwaanka goobta uu daggan yahay codsadaha ama wata ciwaanka goobaha ay ku yaalaan ururada aanan dawliga ahayn, ama ciwaanka goob lagu dhawaaqay inaysan habbooneyn, iyadoo loo cuskanayo wareegto ama wargelin qoran oo rasmi ah oo ay soo saartay hay'ad awood u leh, lama aqbali doono.

4. Codsiyada ka socda codsadayaasha daggan Xarumaha iyo Hoyga Qaabilaada ee Codsadayaasha Magangalyada Caalamiga ah lama aqbali doono.

5. Codsiyada ka socda codsadayaasha ku nool xarunta hoyga ‘Limnes’ ee loo qoondeeyey inay noqoto meel la dago lama aqbali doono.

6. Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa bixiya Agaasimaha Waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada (oo uu ku jiro wakiilkooda idman).

7. Gunnada dhaqaale ee dabooleysa baahiyaha aasaasiga ah (cuntada, dharka iyo kabaha) iyo gunnada dhaqaale ee dabooleysa korontada, biyaha iyo kharashaadka yaryar ee shakhsi ahaaneed waxaa lagu bixiyaa jeeg iyo/ama xawaaladaha xisaabaadka bangiyada magangalyada caalamiga ah.

8. Qadarka gunnada dhaqaale ee lagu daboolaayo kharashaadka yaryar ee ilmaha aanan qaangaarin waa ay kala duwan yihiin iyadoo loo eegayo goobta uu daggan yahay codsadaha.

9. Gunnada dhaqaale ee dabooleysa gunnada kirada iyo bixinta hormariska kirada waxaa lagu bixiyaa jeeg iyo/ama xawilaadda xisaabta bangiga ee mulkiilaha guriga.

10. Bixinta lacagta kirada waxa ay dhaqangaleysaa laga bilaabo marka la saxiixo heshiiska kireynta, kaas oo noqonaya ama ka dambeeya taariikhda la ansixiyo codsiga. Wixi kale ee ah sheegashooyinka iyo shuruudaha mulkiilaha guriga (sida daboolista biilasha biyaha iyo korontada, kharashka isticmaalka guud, wixii waxyeelo ah ee ay guriga u geystaan kireystayaasha) waxa ay khuseeyaan qofka kireysanaya dhismaha dushana kama saarna waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada.

11. Qadarka kirada ee ku xusan jaantuuska kore, iyada oo ay ku xiran tahay inta qof ee uu ka kooban yahay qoyska, ayaa ah qadarka ugu badan ee la bixiyo. Haddii lagu heshiiyo lacag yar, lacagtan yar ayaa la siin doonaa mulkiilaha guriga.

12. Haddii ay dhacdo in shakhsiyaad hal meel iskula noolaadaan, qadarka wadarta lacagta kirada ah ee la siinayo mulkiilaha guriga waa in aysan ka badnaanin gunnada kirada ee u dhiganta tirada shakhsiyaadka isla nool marka loo eego jaantuuska kore.

13. Haddii codsadayaasha (qaangaar ah) ay hal guri isla daggan yihiin, qadarka wadarta lacagta kirada ah ee la siinayo mulkiilaha guriga waa in aysan ka badnaanin gunnada kirada ee u dhiganta tirada shakhsiyaadka isla nool marka loo eego jaantuuska kore. Marnaba wadarta gunnada kirada la oggol yahay kama badnaan karto lacagta kirada ee guriga. Gaar ahaan, ugu badnaan labo qof oo qaangaar ah ayaa la isla dajin doonaa guri qaada 1-sariir, ugu badnaan afar qof oo qaangaar ah guri qaada 2-sariir iyo ugu badnaan lix qof oo qaangaar ah oo isla daga guri qaada 3-sariir.

14. Waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada waxa ay xaq u leedahay inay codsato caddeymo dheeraad ah ama macluumaad kale iyo inay hesho macluumaadka iyo xogta ka socota adeegyada/waaxaha kale ee la

xidhiidha codsadayaasha/dadka la caawiyay iyo kuwa ku tiirsan, kuwaas oo la xidhiidha codsiga.

15. Haddii ay dhacdo in codsadaha iyo/ama xubin kale oo qoyska katirsan ay sheeganayaan inaysan awoodin inay shaqeeyaan dhibaatooyin caafimaad dartood, Guddiga Qiimaynta Gaarka ah ayaa magacaabi kara maamulka awooda u leh inuu qiimeeyo awoodda shaqo.

16. Agaasimaha Waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada (oo uu ku jiro wakiilkooda idman) ayaa kormeero iyo booqashooyin ku sameeya goobta uu deggan yahay codsadaha/qofka la caawiyay mar kasta oo tan loo arko inay habboon tahay si loo xaqiijiyo nuxurka codsiga iyo xaq u yeelashada kaalmada joogtada ah.

17. Qofkasta oo qaadanaya Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa ku waajib ah in isla markiiba uu u sheego waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada wixii isbeddel ah ee saamayn kara lacag bixinta, sii wadida, dhimista ama joojinta gunnada.

18. Ka faa'iideyste kasta oo sameeya hadal ama matalaad been abuur ah ama qariya wax macluumaad ah oo lagu qaadanayo, lagu sii wadayo helitaanka Agabka Kaalmada Soodhaweynta waxaa waajib ku ah soocelinta wixi ay ka qaateen waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada waxaana laga yaabaa in dambi lagu soo oogo.

19. Gunnada la siin doono ka faa'iideystayaasha waxa ay khuseyn doontaa laga bilaabo taariikhda soo gudbinta codsiga, waase haddii qodobada sharciga la buuxiyo.

## 5. <u>Joojinta Agabka Kaalmada Soodhaweynta</u>

Qofka waxaa laga joojinayaa ka faa'iideysiga gunnada Agabka Kaalmada Soodhaweynta haddii uusan buuxin shuruudahan soo socda:

- Marka waaxda Adeegga Magangalyada ay siiso sharciga ka faa'iidaysiga magangalyada caalamiga ah (heerka qaxooti siyaasadeed iyo heerka dhammaystirka magangalyada).
- Marka xaalada codsadaha ay joogsato inay jirto. Si gaar ah, heerka codsaduhu wuxuu khuseeyaa ilaa taariikhda go'aanka madaxa waaxda Adeegga Magangalyada uu ka dhaqangelayo oona **lala socodsiiyo codsadaha** oo la dhaafay wakhtigii loogu talagalay racfaan ka qaadashada go'aanka uu qaatay madaxa waaxda Adeegga Magangalyada. Xaalada codsadaha waa inay siijirtaa marka uu racfaan u gudbinayo Maxkamadda Maamulka ee Magangalyada Caalamiga ah oo ka dhan ah go'aanka uu qaatay madaxa waaxda Adeegga Magangalyada iyo ilaa inta laga soo saarayo go'aanka kama dambaysta ah ee Maxkamadda Maamulka. Go'aanka diidmada ah ee hoos yimaada habraaca caadiga ah iyo siinta heerka magangalyada dhammeystirka ah, **racfaan waa in lagu soo gudbiyaa muddo 30 maalmood gudahooda ah.** Go'aanka diidmada ah ee hoos yimaada habraaca degdegga ah, codsiyo cad oo aan sal lahayn,

ka noqosho iyo noocyada kale ee ku qoran Qodobka 12A ee Sharciga, **racfaan waa in lagu soo gudbiyaa muddo 15 maalmood gudahooda ah.**

- Marka laga tagayo aaggaga ay maamusho Jamhuuriyadda Qubrus muddo kasta oo ay tahay.
- Marka la dhigo xabsiga. Waxaa la fahamsan yahay in kiisaska marka qofka xabsiga la dhigay uu yahay xubin katirsan qoyska, bixinta Agabka Kaalmada Soodhaweynta ee qoyska waa ay sii socon doonaan iyada oo aanan xisaabta lagu darsaneynin qeybta ku aadeysa qofka xiran.
- Marka ay diidaan booqasho ka socota agaasimaha waaxda Adeegyada Daryeelka Bulshada (oo uu ku jiro wakiilkooda idman) oo uu ku tagayo goobta ay daggan yihiin ama ay diidaan inay xog ka bixiyaan arrin kasta oo saameyn ku yeelan doonta go'aan kasta oo la qaato inta ay socoto qiimeyntooda ama qiimeynta daboolista Agabka Kaalmada Soodhaweynta.
- Marka ay qariyaan ilaha dhaqaale oo sidaa daraadeedna si aan habboonayn uga faa'iideysteen Agabka Kaalmada Soodhaweynta.
- Marka labo jeer ay diidaan shaqo looga soo bandhigay waaxaha iyo xilliyada la oggol yahay sababaha ay u diidayaana aanan loo arkin in si sax ah loo aqbali karo/loo sababeyn karo. Haddii iyaga ama qofkale oo katirsan qoyska oo awoodo inuu shaqeeyo uu diido, waxaa laga saari doonaa diiwaanka Adeegga Shaqada Dadweynaha waxa ayna waayi doonaan wixi gunno ah oo ay xaq ugu lahaayeen xaaladaas.
- Xaqa lagu gudbinayo codsi cusub, kadib marka codsadaha loo arko inuu si iskiis ah isaga shaqo la'yahay, waa in la siiyaa xaqaas 4 bilood kadib.
- Marka codsaha uu shaqeeyo, haddii uu katirsan yahay qoys, dakhliga shaqaale ee soogala uu ka yaryahay wadarta guud ee gunnada uu qoysku xaqa u leeyahay, iyadoo lagu saleynayo qadarka lagu cayimay Agabka Kaalmada Soodhaweynta. Haddii aanay sidaasi ahayn, Agabka Kaalmada Soodhaweynta waa in laga joojiyaa.